

## Darafyadda "Margins"

**Darafyadda**, waxaa kaloo loo yaqaan "**daraafyadda qaybaha**," waxaa loo tixraacaa fogaashaha u dhaxeeyo burada iyo cirifyada hilibka ku wareegsan oo lala saaraayo burada kansarka.

Goorta burada laga saaro. Waxaa kaloo la saarayaa hilibka ku wareegsan burada. Burada cirfaha ku wareegsan waxaa la marinayaa qad gaar ah, si loo arko cirfaha dibada ama darafyadda si cad loogu fiiriyo weyneeyaha "microscope". Wareega hilibka lagu baaraayo weyneeyaha si loo arko darafyadda in ay ka madax-banaan tahay unugyada kansarka. Waxayna ku xiran tahay waxa lagu arko, darafyadda burada waxaa lagu qeexayaa sida soo socoto:

- **Darafyadda Hubaalka ah:** Unugyada kansarka oo u baxsan dibada laga jaro, goobta qada leh.
- **Darafyadda saliidka ah:** Malaga helin unugyada kansarka goobta qada. (mararka qaarkood darafta saliidka ah waxaa lagu magacaabaa darafyadda nadiifka).
- **Darafyada isku dhaw:** waa goobaha u dhaxeeyo darafyadda hubaalka iyo saliidka waxaa loo aqoonsan yahay "dhawaasho."

Waa mid aad u muhiim ah in laga saaro darafyadda kansarka si buuxdo oo ka madax-banaan asaalka burada wareegeeda, in laysku dayo si loo hubiyo kansarka in oo dhamaaday. Taas waxaa loo tixgaliyaa in ay tahay "**nadiifinta darafyadda**."

Ogaashaha sida oo ugu dhaw yahay unugyada kansarka geesaha laga saaraayo burada waxay ka cawineysaa sida loo sameey lahaa daaweyn sax ah oo ku haboon. Kani waxay si gaar ah muhiim ugu tahay go'aan gaarida, haddii loo baahan yahay qaliin dheeraad ah. Haddii darafyada hubaalka ay tahay, waxaa loo baahan yahay qaliino fara badan. Haddii darafyadda ay isku dhaw yihiin, waxaa loo malayaa in qaliin loo baahan yahay ama aan qaliin loo baahneeyn. Haddii darafyadaa saliid yihiin, waxaa dhici karta in aanan loo baahneeyn qaliin. Fasiraada "darafyadda hubaalka" way ku kala duwan yihiin hosbitaalada. Waxaa weydii kartaa dhakhtarkaada haddii aad leedahay darafyada hubaalka, saliidka, ama isku dhaw, iyo habka u fasiraayo dhakhtarkaada "hubaal".